# Golaha Wakiillada

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 4aad fadhiyadii 6aad iyo 7aad*

**Wakhtiga uu Furmay:** 09:55 subaxnimo
**Taariikhda:** Salaasa, 13-ka iyo Sabti, 17-ka September 2022

**Guddoonka:** Mudane Cabdirisaaq Khaliid Axmed
**Quraanka:** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga:"-** Maalinta 2aad ee Doodda Mashruuca Sharciga Qoxoontiga iyo Magan-galyo-doonka JSL.

**Guddoomiye Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed**

Mudanayaal, fadhigu wuu inoo furan yahay, waxaanan halkii ka sii wadi doonaa doodii inoo socotay. Haddaba, waxaan ku soo dhawaynayaa:

**Md. Cabdikariin Aadan Cumar** (8min 49sec) Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, marka hore waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka (ASC). Ugu horayn, waxaan taageerayaa saddexdii xildhibaan ee iga horreeyey soo-jeedimahoodii, kuwaas oo kala ahaa Xildhibaan Faysal, Xildhibaan Mustafe iyo Xildhibaan Xasan. Dooddoodu waxay ahayd in marka hore la helo hay'adda uu xeerkan ku aas-aasanyahay.

Haddii aan dooda xeerkan galo, **Qodobka 11aad, faqraddiisa 3aad**, Xarafkiisa "A", waxaan soo jeedinayaa in lagu daro muddada ay guddidu ku soo saaraysaa go'aanka, taas oo ka bilaabmaysa maalinta ay Waaxda Diiwaangelintu soo gudbiso codsiga, muddadaasna ay noqoto 60 maalmood, si qofku u ogaado inta uu sugayo go'aanka.

Qodobkaa waxa kale oo aan taageeray wax-ka-beddelkii guddida, waxaana sidoo kale soo jeedinayaa in lagu daro in guddidu dhexdooda iska doorato Guddoomiyaha Guddida.

**Qodobka 12aad, faqraddiisa 3aad**, oo odhanaysa Ciidanka Socdaalku waxay la yeelanayaan waraysi, ka dibna waxay u soo gudbinayaan xafiiska ugu dhow ee hay'adda; halkaas waxaan soo jeedinayaa in lagu daro in ay sidoo kale gudbiyaan macluumaad ama warqad caddeynaysa xogta qofka oo dhamaystiran, warqaddaas oo uu ku dhex mari karo waddanka, isla markaana leh wakhti ansax ah oo ah 15 maalmood.

**Qodobka 13aad, faqraddiisa 2aad**, waxaan ku soo kordhiyay faqradda 6aad oo u dhigan sidan: Hay'addu waa in ay siisaa qofka warqad uu dalka ku joogo inta go'aan laga gaadhayo, taas oo noqonaysa muddo 6 bilood ah, maadaama inta go'aanka laga gaadhayo uu u baahan yahay sharci uu dalka ku joogayo.

**Qodobka 14aad, faqraddiisa 1aad,** halka ay ku qoran tahay "waa in uu ku soo gudbiyaa codsi qoraal ah", waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo "waa in uu ku tagaa muddada ku cad warqadda uu sito ee Ciidanka Socdaalku soo siiyeen". Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in halkaa lagu daro faqraddan: "waa in uu buuxiyaa foomka magan-galyo-doonka ee loogu talo galay".

**Md. Cabdiqani Maxamed Aadan** (3min 48sec):- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa in xeerkan laga beddelo qodobbada soo socda:

**Qodobka 13aad**, oo ka kooban shan (5) faqradood, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **faqradda 6aad**, una dhigan sidan: "Qof si sharci ah dalka ugu joogay waxa uu noqon karaa qaxoonti, sababahana waa in lagu daraa."**Qodobka 14aad, faqraddiisa 1aad**, halka ay ku qoran tahay "waxa uu codsi qoraal ah u soo gudbinayaa hay'adda", waxaan ku beddelayaa: "**Waa in uu codsiga qoraalka ah u gudbiyaa Laanta Socdaalka**."

Waxaan kale oo soo jeedinayaa in qodobkan **qaab ahaan loo habeeyo** lana kala hormariyo sidan:

1. Diiwaangelinta Codsiyada
2. Codsiga Qaxoontinimo iyo Magan-galyo-doonka
3. Qaabka Codsiga
4. Qiimaynta Codsiyada

**Qodobka 18aad**, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro faqrado odhanaya: "**Qaxoontinimada iyo magan-galyo-doonku waa in la kala saaraa**."**Qodobka 19aad**, oo sheegaya in xerada ku-meel-gaadhka ah laga dhigo xero ku-meel-gaadh ah, isla markaana aanay is-qabanayn ku-meel-gaadh iyo rasmi, halkaas waxaan ku beddelayaa: "**Xerada ku-meel-gaadhka ah waxa looga rari karaa xero rasmi ah haddii loo baahdo**." Sababtu waa in haddii xero yar oo qaxoonti ah ay qaxoonti kale ku soo biiraan, aanay si toos ah u noqon karin xero rasmi ah.

**Md. Cabdikariin Meecaad Xuseen** (1min 53sec) ASC. Mudanayaal, dooda hore waan uga qayb qaatay, balse waxa ii muuqata in ay jiraan meelo aan hore uga tagay. Qodobka 24aad iyo Qodobka 25aad waxay u muuqdaan kuwo is khilaafsan, sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in da'da ku xusan labadaa qodob la is waafajiyo. Qodobka 41aad, halka ay ku qoran tahay in go'aanka kala noqoshada qoxoontinimada uu iska leeyahay guddidu, waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo in go'aankaas uu iska leeyahay Maxkamaddu, isla markaana uu noqdo go'aan kama dambays ah.

**Md. Abubakar Siciid Cali** (8min 08sec) Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, ASC. Ugu horayn, waxaan doodayda ka bilaabayaa

Qodobka 2aad ee Eray-bixinta, gaar ahaan “Magan-galyo-doon”. Waa in eray-bixintu u socotaa si qeexan, lana yidhaa “waxaa loola jeedaa…”.

Waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo qeexidda hore sidan: “Magan-galyo-doon waxaa loola jeedaa qof kasta oo muujiyay cabsi siyaasadeed, deegaan ama dhibaatooyin kale ilaa dhammaadka”, iyadoo laga saarayo erayga “waa qof”.

Qaybta 2aad ee xeerkan, ciwaankeeda waa in la saxo, maadaama qalad ku jiro. Qodobka 5aad, faqraddiisa 2aad, Xarafka “A”, oo ka hadlaya dhawrista xuquuqda aasaasiga ah ee qoxoontinimada, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro “ee qofka”. Sidoo kale, Xarafyada “C” iyo “F” waa in lagu daraa “qofka”.

Waxaan kaloo soo jeedinayaa in xarfaha A, B, C lagu beddelo Af-Soomaali ahaan B, T, J. Sidoo kale, Qodobka 5aad, faqraddiisa 2aad, xarfaha “A” iyo “E” waa in laga saaraa “iyo” lana beddelaa “AMA”.

Qodobka 22aad, faqraddiisa 1aad, halka lagu sheegay A iyo C, waxaan soo jeedinayaa in Xarafka “C” meesha laga saaro, sababtoo ah danbi culus iyo danbi fudud meelna laguma qeexin xeerka. Halkii, waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo: “Haddii uu galo danbi lid ku ah nabadda, Shareecada Islaamka iyo xeerarka dalka”.

Waxaan sidoo kale taageerayaa soo-jeedintii Xildhibaan Meecaad ee ahayd in Qodobada 24aad iyo 25aad la is waafajiyo, da’dana laga dhigo 15 jir, maadaama aynu Islaam ahaan ku qaan-gaadhno da’daas.

**Md. Xasan Axmed Cilmi (Xasan Kayse)** (5min 57sec) Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Haddii aan ka bilaabo Qodobka 4aad ee xeerka, waxa ka muuqata in aan si cad loo kala saarin qofka qoxoontiga ah iyo qofka magan-galyo-doonka ah. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in xeerkan si cad loogu kala cadeeyo xuquuqda ay kala leeyihiin labadaa qof.

Sidoo kale, xeerku ma sheegin qof ku gala magan-galyo safaarad ay Somaliland leedahay, taasna waa in si cad loogu daraa xeerka.

Qodobka 5aad, Xarafka “F”, ee sheegaya in qofka qoxoontiga iyo magan-galyo-doonka ah loola dhaqmo si waafaqsan xeerarka, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro faqrado gaar ah oo ka hadlaya qofka magan-galyo-doonka siyaasadeed ku yimaada ama ku gala safaarad Somaliland leedahay, lana cadeeyo habka loola macaamilayo si waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee magan-siinta siyaasadeed.

Qodobka 9aad waxa lagu sheegay cidda iska leh maamulka hay’adda qoxoontiga iyo barakacayaasha, hase yeeshee waxa ka maqan maamulka magan-galyo-doonka. Qofkan magan-galyo-doonka siyaasadeed u baahan yahay cid si dhow ula socota taariikhdiisa, sida Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Arrimaha Gudaha iyo Sirdoonka Qaranka. Sidaa awgeed, waa in ay jirtaa cid xaaladdiisa la socota, maadaama qofku is beddeli karo.

Waxa kale oo habboon in xeerka la hoos geeyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, maadaama ay iyadu masuul ka tahay amniga, lanaanta socdaalka iyo sirdoonkuba hoos yimaadaan.

Qodobka 21aad, faqraddiisa 1aad, waa in la hubsadaa in qofka loo aqoonsanayo qoxoontinimada aanu ka mid ahayn xubnaha danbiilayaasha loo aqoonsaday ee dalkii uu ka yimid ama aanu ka tirsanayn ururro argagixiso ah, taasna waa in baadhis lagu sameeyaa.

Qodobka 11aad, ee ka hadlaya guddida go'aan ka gaadhista qoxoontinimada, waxaan soo jeedinayaa in guddidu ka koobnaato 7 xubnood oo kala imanaya:
2 xubnood Wasaaradda Arrimaha Dibadda, 2 xubnood Hay'adda Qoxoontiga, 1 xubin Laanta Socdaalka, 1 xubin Komishanka Xuquuqal-Aadamaha, iyo 1 xubin oo ka socota Garyaqaanka Guud.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ------------------------------------------------ | -------------------------------------- |